



Vänersborg 1 duseembar 2020

## Waa salaaman tahay arday dugsi sare!

Laga bilaabo toddobaadka soo socda, ilaa fasaxa u ka bilaaban doono markii taariikhda ay ku beegan tahay 18 duseembar, waxay waxbarashada dugsiyada sare ee Isbahaysiga Aqoonta [Kunskapsförbundet], noqon doontaa kuwa musaafad ku salaysan, taasoo kordhin doonto tirada ardayda qaabkaas wax ku bartaan.

Sababta waxay tahay in maamulka u kaalin ka geysto hoos u dhigida heerka fayruus faafinta ee bulshada. Sababta kale waxay tahay ka maqnaashada tirada badan ee ardayda iyo shaqaalaha ba. Sidaas awgeed, haddii fursadda musaafad wax ku barashada la hirgeliyo, waxa sare u kici doonto tirada ardayda iyo shaqaalaha ba oo iyagoo guryahooda ku sugan qabsada hawlhooda iyo kuwa waxbarashada ba.

## Dugsi-dhigashada waa la sii wadayaa - fasaxa waa la ciribtiray

Wax ku barashada musaafada ku salaysan mas'uuliyad wayn ayay ardayga saarta. Wixii fasax ahaa waan ciribtirnay, waanu sii wadanaynaa waxbarashada. Adiguna waa inaad xilkasnimo dheeraad muujisa oo ku saabsan dugsi-dhigashadaada, taasoo ku suurtagelin doonto inaad hadafkaaga gaarto oona hesho shahaado heer sare ah.

## Dhawr naseexooyin naga guddoon

- La soco warbixinta aan hab joogto ah aan ku soo bandhigi doono madasha [Its Learning] iyo barta internetka [kunskapsforbundet.se](https://kunskapsforbundet.se)
- Gurigaaga ka sameeyso goob gaar ahaan waxbarashada ugu talo gasho. Haddii sanduuq ama skafalo u guuriga ku yaallo waxaad u adeegsan kartaa armajada ardayga ahaan. Miisku wuxuu ku noqon karaa miiska iskullada, kombuyuutarka iyo waxyaalaha kale ee dugsiya si waxtar leh ayaa u adeegsan kartaa.
- Xajiso hab-raaca joogtada ah. Aroorti hurdada ka toos habeenkiina dhaqso seexo. Haddii saacadaha ay ka qaldamaan waxaa wax yeelmayo xoogsaarida iyo waxbarashada.
- Waxaa fiican in waalidiintaada ay arrintaan lug ku lahaadaan, tus qaabka aad wax ugu barato guriga iyo casharrada ay macalimiinta ku siiyeen.

Haddii caawinaad aad u baahan tahay ama arrin kale ay jirto, la xiriir macallinkaaaga, IT, Waaxda daryeel-caafimaadeedka ardayda [Elevhälsan] ama agaasimayaasha dugsiyada. Waxay heegan u yihiin in waxbarashada ay ka caawiyaan - xitaa haddii ay musaafad ku salaysan tahay.

## Haddii aad xannuunsan tahay - waa inaad sida caadada ah aad maamulka iskuulka wargelisaa.

Haddii aad xannuunsan tahay waa in adigoo adeegsanayo madasha [Skola24] wargelisaa maamulka iskuulka, sida hadba caadada ay tahay.

## Iskuulka ma xirna



Sidii xilliga gu'ga oo kale albaabada iskuullada looma xirin. Qaar ardayda kamid ah waxay booqan doonaan iskuullada sidii ay imtixaanno u samaayeen awgeed, waxyaalo wax ku ool ah ama taageero waxbarashada ku helaan.

**Macallimiinta ayaa ku wargelin doono arrinta adiga gaar ahaan ku khuseeyso – siidii wax warbixin ah ay ka lummin awgeed waxaa muhim ah inaad wax kasta kala socoto madasha [It's learning, Instagram ama Facebook].**

Waxaan rajeynaynaa in bisha diseembar aan go'aan ka gaarno, kaasoo xiriir la leh sida ay noqon doonto markii la gaaro xilliga dugsi-dhigashada jannayo 2021. Waxaa goortaas rajeynaynaa in dhammaantiina aad goobaha dugsiyada wax ku baran kartaan oona albaabada loo furi doono sida caadada ah. Sidii sidaas u noqoto awgeed waa in qof kasta u arrinta kaalin ka geysta, oona u dhaqma hab waafaqson waxa aan imminka ogsoon nahay:

- Gurigaaga iska joog haddii calaamaha cudurka aad dareento, xitaa haddii ay yihiin kuwa fudud. Shaybaar iska qaad.
- Gacmaha iska dhaq.
- Xaji kala fogaanshada!
- Ha adeegsan gaadiidka guud haddii aynan lagamaarmaan ahayn
- Iska ilaali goobaha dadka ay ku badan yihiin

Waxyaalaha aan sameeyn doono ka sokow waa in aan aqoon u leenahay, in dhammaan dhaqdhaqaaqyada aan sameeyno, ay saamayn ku yeelan doonaan haddii xilliga gu'ga ay noo suurtagasho in sidii berri hore u noolol-maalmeedkeenna noqdo. Sidaas awgeed waa in aan:

- Iska ilaalinaa booqashada xarumaha ganacsashada iwm oo ah goobaha dad badan isugu yimaadaan.
- Ha tegin xafladaha iyo goobaha la mid ah
- Ha la kulmin arday aan ahayn kuwa caadi ahaan aad la kulanto

Haddii hab-dhaqanka cusub aan u dulqaadanno, waxaa suurtagal noqon karto in wadajir aan sannadka cusub u xafladaynno ka qalijebinta dugsiyada sare.

❤️ U muujinta tixgelinta awgeed xaji kala fogaanshada ❤️

Maamullada iskuullada